EASTERN CARVER COUNTY SCHOOLS
NUTRITION SERVICES

Luulyo 2024

Qoysaska Degmada Carver ee qaaliga ah:

Ku soo dhawoow sanad dugsiyeedka 2024-25! Waan ku faraxsanahay inaan u adeegno ardaydeena oo aan ku dadaalno sidii aan ugu diyaarin lahayn inay waxbarashadooda ku guuleystaan anagoo siinayna cuntooyin nafaqo leh oo macaan ah. Fadlan qaado dhowr daqiiqo si aad dib ugu eegto macluumaadka lagu bixiyay xirmadan.

**<u>Qiimaha cuntada:</u>**
Bishii Maarso 2023, biilka Minnesota ee Cunnada Dugsiga Bilaashka ah ayaa la sharciyeeyay. Tani waxay siinaysaa dhammaan ardayda degmadeena hal quraac iyo hal qado oo bilaash ah maalin dugsiyeed kasta lacag.

Cuntada kale ee la carte-ka ah ee isugu jira cunto fudud, cabitaanno, iyo galitaanka labaad, ayaa laga iibsan karaa dugsiyadayada hoose, dhexe iyo sare. Ardayda rabta inay iibsadaan cuntada la carte waa inay lacag ugu jirtaa akoonkooda Adeegyada Nafaqada.

**<u>Codsiga Faa'iidooyinka Waxbarashada (Codsiga cuntada bilaashka ah iyo qiimaha jaban):</u>**
Ardaygaagu waxa laga yaabaa inuu u qalmo dheefaha benefitka waxbarashada. U qalmida faa'iidooyinka waxbarashadu waxay u ogolaan kartaa ardaygaaga inuu helo kharashyada iskuulka laga dhimay ama laga dhaafay khidmadaha dugsiga ku salaysan oo ay ku jiraan:

- caymiska teknoloojiyada
- ciyaaraha fudud iyo hawlaha activitiyaasha
- fasallada waxbarashada community ay bixiyaan
- safarrada rixlada iskuulka
- Baarkinka

Intaa waxaa dheer, waxay qoyskaaga u qalmi kartaa qiimo dhimis bulshada dhexdeeda ah sida:

- 50% oo lagaa dhimo gaadiidka South west-ka
- membernimo bilaashka ah ee Museum-ka Carruurta
- Faa'iidooyinka P-EBT ee xiliga xagaaga

Xogta faa'iidada waxbarashada waxay sidoo kale u qalantaa degmada dugsigeena maalgelin dheeraad ah oo muhiim u ah taageeridda baahiyaha ardayda. Si aan u hubinno in codsigaaga faa'iidooyinka waxbarashada laga baaraandegay bilawga sannad dugsiyeedka, fadlan soo celi foomka ku lifaaqan Agoosto 23-keeda ama ka dalbo onlaynka MySchoolApps oo aad ka heli karto eccs.mn/nutritionservices. Waxa kale oo aad soo gudbin kartaa codsi cusub wakhti kasta inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka marka dakhligaaga ama tirada dadka kugu tiirsan ay isbeddelaan.

**<u>Xisaabaadka Adeegyada Nafaqada:</u>**
Arday kastaa wuxuu leeyahay akoon u gaar ah Adeegyada Nafaqada oo u baahan lacag-bixin gaar ah. Waxaa jira siyaabo badan oo aad lacag ugu shubi karto akoontada Adeegyada Nafaqada ee ardaygaaga. Sannad dugsiyeedka 24-25, Adeegyada Nafaqadu waxay u wareegeen adeeg bixiye cusub, MySchoolBucks, dabagalka akoonnada iyo lacag bixinta.

- Jeegag ayaa loo diri karaa ardaygaaga dugsiga waxaana la siin karaa lacag-hayaha ama xafiiska dugsiga. Fadlan jeega ku aadi District 112 Nutrition Services (Adeegyada Nafaqada ee Degmada 112) oo ku qor magaca ardaygaaga, grade-ka iyo iskuulka meesha xusuusta.
- Lacagaha caddaanka ah ayaa ardaygaaga loogu soo diri karaa dugsiga iyadoo baqshad ku jirta waxaana la siin karaa lacag-hayaha ama xafiiska dugsiga. Fadlan ku qor magaca, fasalka, iyo dugsiga ardaygaaga baqshadda.
- Bangiyo badan ayaa bixiya adeeg biil bilaash ah. Tani waxay ku siinaysaa awooda in bangigaagu si toos ah lacag ugu soo diro Adeegyada Nafaqada si loogu rido koontada ardaygaaga. Goobta "qaataha", geli 112 Nutrition, 11

Peavey Rd, Chaska MN, 55318. Geli magaca ardaygaaga qaybta qoraalka. Waxaad dooran kartaa lacag-bixin hal mar ah ama waxaad dejin kartaa mid soo noqnoqota. Fadlan kala xidhiidh bangigaaga wixii faahfaahin dheeraad ah.

- Lacag-bixinta onlaynka ah waxa lagu samayn karaa kaadhadhka kreditka/debit-ka ama checkin-akoonkaaga. Si aad u hesho adeegan, booqo www.myschoolbucks.com. Ma jiro wax lacag ah oo loo isticmaalo MySchoolBucks si loo eego dheelitirka ama taariikhda iibsiga cunnada ee ardaygaaga. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira $3.25 khidmad wax kala beddelasho ah halkii deebaaji si loo isticmaalo nidaamka lacag-bixinta onlaynka ah. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan helitaanka nidaamkan, fadlan ka wac Julie Eklund 952-556-6152, ama taageerada MySchoolBucks 1-855-832-5226.

Si aad u hubiso in koontada ardaygaagu diyaar u tahay maalinta ugu horeysa ee iskuulka, fadlan ugu shub lacagaha online-ka ah, lacagta bixi maalinta Open-House-ka  ee dugsiga ardaygaaga, ama u dir boostada dugsigooda (Attn: Adeegyada Nafaqada), Agoosto 23-keeda.

Ardaydu waxay cuntada ku helaan oo ku iibsadaan Adeegyada Nafaqada iyagoo isticmaalaya nambarkooda aqoonsiga arday (Student ID). Haddii ardaygaagu yahay arday ku soo laabanaya Degmada 112 oo aanu hore u garanayn lambarka aqoonsiga ardaynimadooda, waxa laga heli karaa bogga waalidka ee Infinite Campus. Haddii ilmahaagu ku cusub yahay degmada, waxaad ka heli kartaa lambarka aqoonsiga ardaygaaga maalinta Open house-ka/oriyantashanka dugsigaaga ama waxaad wacdaa 112 xafiiska nafaqada 952-556-6145.

**<u>Cuntooyinka gaarka ah:</u>**
Haddii aad u codsanayso ardaygaaga cunto khaas u gaar ah sannad dugsiyeedka 2024-2025, fadlan dhakhtarkaaga shatiga haysta, kaaliyaha takhtarka, ama kalkaalisada shaqada sare ee diiwaangashan (tusaale kalkaaliye caafimaad oo shahaado haysta) ha buuxiyo foomka Warbixinta Cunto Gaarka ah. Waxaan codsaneynaa in foomamkan la cusboonaysiiyo sannad dugsiyeed kasta iyo/ama mar kasta oo ardayga laga helo cudurka ama cuntada u gaarka ah ay isbeddelaan. Fadlan hubi in foomka ardaygaaga dib loogu soo celiyo xafiiskayaga ugu dambayn Agoosto 16keeda si loo hubiyo sidii loogu diyaar garoobi lahaa bilawga sannad dugsiyeedka. Waanu kula soo xidhiidhi doonaa si aanu uga hadalno baahiyaha ardaygaaga marka xafiiskayagu helo Foomka Cunto Gaarka ah ee ardaygaaga. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan kala xiriir Kim Franta FrantaK@District112.org ama 952-556-6151.

**<u>Xog dheeraad ah:</u>**
Bogga Adeegyada Nafaqada ee ku yaal websaydka Dugsiyada Degmada Bari (www.district112.org) waxay ku siinayaa macluumaad badan oo xiiso leh oo waxtar leh oo ay ku jiraan menus, macluumaadka nafaqeynta, qiimaha la carte, iyo macluumaadka xiriirka. Waxa kale oo aanu haynaa muuqaalo wargelin ah oo soo bandhigaya cuntooyinka cusub iyo kuwa macaan ee aan bixino maalin kasta. Waxaad naga raaci kartaa Instagram-ka @District112Nutrition si aad u hesho macluumaad cusub oo ku saabsan waxyaabaha waanaagsan ee aan ka samayno dugsiyada.

**Su'aalo ma qabtaa?** Dhammaan kooxdayada Adeegyada Nafaqeynta waxaa ka go'an inay bixiyaan cunto macaan oo nafaqo leh maalin kasta. Waanu soo dhawaynaynaa su'aalahaaga, faallooyinkaaga iyo welwelkaaga hadda iyo inta lagu jiro sannad dugsiyeedka. Waxaad naga heli kartaa 952-556-6150 ama Nutrition@district112.org . Ardey si fiican u nafaqeysan wuxuu wax u bartaa si maskaxiyan ah oo waxbarashada diiradda saaraa, waxaanan ku dadaalnaa inaan u diyaarino ardayda degmadeena kuwo guuleysta! Ku raaxayso fasaxa inta ka hadhay xagaagaaga oo sannad dugsiyeedka wanaagsan!

Si daacad ah,

## Kim Franta

Kim Franta

Agaasimaha Adeegyada Nafaqeynta